MILWAUKEE
PUBLIC SCHOOLS

Juun 2, 2021

Salaam bulshada MPS,

Maadaama aan ku sii dhowaanay inaan dhamayno sanad dugsiyeed kale, waxaan ku faraxsanahay taageerada joogtada ah ee ka socota qoysaskeena iyo shaqaalaheena intii lagu gudajiray mid ka mid ah sanadada ugu adag. Waxaan u hamuun qabaa dhamaan waxa soo socda, laga bilaabo farxada xagaaga.

Dhamaanteen inta joogta halkan degmada, xagaaga waa fursada ku sii qorshayn karno sanad dugsiyeedka soo socda. Waxaan Guddiga Maamulka Milwaukee ugu mahadnaqaynaa ansixinta miisaaniyadda iskuulka 2021-22 iyo si buuxda ugu soo laabashada iskuulka qof ahaan looga xaadiro ee shan maalmood usbuucii ah ka-qaybgalka cayaaraha iyo hawlaha ka baxsan manhajyada xilliga dayrta. Degmadu waxay barnaamijka waxbarashada qaabdhismeedka siin doontaa qoysaska dareemaya inay taasi xulashada ugu fiican u tahay ilmahooda.Waxaan sii wadi doonnaa qorshaynta sanad dugsiyeedka iskuulka taas oo diirada lagu saarayo iskuulka udub dhexaadna looga dhigayo ardayda iyadoo ujeedadu tahay xaqiijinta in dhamaan dhallinyeradeena iyo shaqaalaheena ay helaan taageerada ay u baahan yihiin si loo guul gaaro deyrta.

Iyadoo la isku diyaarinayno xagaaga iyo deyrta, waxaan sii wadi doonnaa la shaqeynta Waaxda Caafimaadka Milwaukee si aan u martigelino rugaha caafimaadka ee tallaalka. Tallaalada waxaa loo heli karaa qof kasta oo jira 12 ama ka weyn. Soo degso warqada macluumaadka si aad u eegto taariikhaha, saacadaha, iyo goobaha tallaalka ee MPS.

Waxaa inagu soo food leh xagaa mashquul badan waxaanna jira howlo badan oo loo heli karo qoysaska iyo ardayda. Waxaan kugu dhiirigalinayaa inaad kaqeyb gasho kana qeybqaadato fursadahan cajiibka ah.

Akadeemiyada Xagaaga ayaa Dhawaan Bilaaban doona
Akadamiyadda Xagaaga waxaa loogu talagalay dhammaan ardayda doonaya inay helaan wax barashada baashaal leh iyo inay xilliga dayrta bilaabato iyagoo dhanka tacliinta xoog yeeshay! Booqo mpsmke.com/summeracademy si aad u hesho wixii faahfaahin ah oo dhan. Fasalada K5-8 waxay kaqeyb qaadan karaan kaam lix-todobaad ah oo leh mowduucyo todobaadle ah oo ku saabsan farshaxanka, muusiga, xisaabta, sayniska, iyo akhris-qorista. Casharada waxay soconayaan laga bilaabo Juun 22 ilaa Luulyo 29 8:00 subaxnimo ilaa 12:00 duhurnimo. Ardayda dhigata dugsiga dhexe iyo dugsiga sare waxay heli karaan kabitaan dhanka buundooyinka ah ama wayba ka sii hormari karaan. Laba kal-fadhi ayaa la heli karaa: Juun 7-Lulyo 2 iyo Luulyo 6-29 laga bilaabo 8:30 subaxnimo ilaa 12:30 duhurnimo.

Barnaamijka Bixinta Cuntada Xagaaga ee loogu talagalay Qoysaska MPS - Isdiiwaangeli ugu dambayn bisha Juun 11
Xagaagan, qoysaska ku nool ZIP-koodhyada 53205, 53206, ama 53233 waxaa lagu casuumay inay kaqeybqaataan Barnaamijka Bixinta Cuntada Xagaaga ee MPS. Barnaamijkan wuxuu qeybin doonaa xirmooyinka cuntada quraacda iyo qadada ah bilaha Luulyo iyo Agoosto oo bixinta cuntada waxaa la sameyn doonaa seddex jeer usbuucii waxaana lagu samayn doonaa boosteejooyinka basaska MPS iyo guryaha shaqsiyeed qaarkood. Qoysaska degan Zip-koodhyadaas waxay isdiiwaangelin karaan ugu dambayn Juun 11, 2021, si ay u helaan cunto!

Qoysaska ku nool meel ka baxsan goobaha qeybinta waxay cuntada ka heli karaan Barnaamijka Adeegga Cuntada Jiilaalka ee MPS iyaga oo ka soo qaadanaya cuntooyinka dugsiyada gaarka ah ee MPS. Horeu dalbasho ayaa loo baahan yahay. Cuntada waxaa laga soo qaadan karaa Isniinta, Arbacada, iyo Jimcaha markay tahay 10:00 subaxnimo ilaa 12:00 duhurnimo laga bilaabo Juun 21, 2021. Xirmooyinka cuntada ee horay loo dalbaday waxay ka koobnaan doonaan quraac iyo qado

la baakadeeyey oo loogu talagalay qof kasta oo da'diisu tahay 18 iyo wixii ka yar. Maalmaha Isniinta iyo Arbacada ah, xirmooyinka cuntada waxay ka koobnaan doonaan quraac iyo qado laba maalmood loogu talagalay. Maalmaha Jimcaha ah, carruurtu waxay heli doonaan quraac iyo qado ee maalmaha Jimcaha, Sabtida, iyo Axadda. ah Dalabyada cuntada waxaad ka gudbisaa http://mpsmke.com/meals laga bilaabo Juun 7, 2021.

Fursadaha Shaqaalaynta Xagaaga

- **Barnaamijka Tababarka & Shaqo-gelinta Dhallinyarada ee Xagaaga** ayaa wali codsiyo u qablaya xagaagan! Barnaamijku wuxuu waaya-aragnimo shaqo iyo xirfad shaqo usoo bandhigaa dhalinyarada qaangaarka ah ee 14 - 24 ee deggan Gobolka Milwaukee iyo magaalada Milwaukee. Waxbadan ka baro Employ Milwaukee Earn & Learn.
- Ma waxaad tahay arday ka tirsan MPS oo shaqo raadinaya? Fiiri **Boodhka Shaqada Dhalinyarada ee MPS**! Daraasiin shaqooyin ah ayaa la soo dhejiyaa, shaqooyin waqti-dhiman ah, kuwo waqti-buuxa ah, iyo shaqooyinka xagaaga. Shaqooyinka waxaa ka mid ah wax soo saarka, adeegga cuntada, daryeelka caafimaadka, bakhaarada, iyo waxyaabo kale oo badan. Booqo Boodhka Shaqada Dhalinyerada ee MPS!
- **Milwaukee Recreation** waxay raadineysaa inay shaqaaleyso boosas shaqo oo waqti-buuxa, waqti-dhiman, iyo kuwo shaqo xilliyeed ah sida macallimiin, hoggaamiyeyaal, kalkaaliyaasha goobta, tababarayaal, garsoorayaal iyo taageerayaal caawinaya barnaamijyada dugsiga iyo goobaha bulshada ee magaalada Milwaukee oo dhan ah. Eeg fursada shaqo ee hadda furan oo ka jira Milwaukee Recreation.
- **Darjiinooyinka Degmada Milwaukee** waxay shaqaaleeysiiyaan shaqaale xilliyeed oo leh noocyo badan oo xirfado kala duwan ah si ay ugu adeegaan bulshada. Booqo websaydhka Darjiinooyinka Degmada Milwaukee si aad u hesho boosas bixiya tababar iyo khibrad shaqo oo la xiriira aag aad xiisaynayso.
- **Barnaamijka Tababarka Shaqo ee Fanka Madadaalada Milwaukee** waa barnaamij tababar shaqo oo mushahaar leh oo la bixiyo xagaaga kaas oo ardayda dugsiga sare siiya khibrad shaqo oo la taaban karo oo ku aadan boosaska fanka. Waxbadan ka baro tilmaamaha Barnaamijka Tababarka Shaqo ee Fanka Madadaalada MKE oo buuxi codsi maanta!

Saacadaha Xagaaga ee Xarumaha Twilight
Xarumaha Twilight waxay ku bixiyaan barnaamijyo iyo saacado dheeri ah ee iskuulada la xushay si markaa dhalinyarada magaalada ay u helaan meel aamin ah oo ay aadaan fiidkii. Sanadkaan, shan Xarumood oo Twilight Centers oo dugsiyada sare ah (da'da 12-18) iyo hal xarun Twilight Center ah ee dugsi dhexe (da'da 10-15) ayaa u furan dhalinyarada si ay si nabadgelyo leh uga qaybqaataan howlaha kobcinta, ciyaaraha boodhka, isboortiga, jimicsiga furan, Dabaasha Twilight (South Division), iyo inbadan! Ka baro wax badan oo ku saabsan Twilight Centers oo furan xagaaga.

Saacadaha Xagaaga ee Kuleejka iyo Xarumaha Xirfadaha Shaqo
Shaqaalaha Kuleejka iyo Xarumaha Xirfadaha Shaqo ee MPS waxaa la heli karaa xagaaga oo dhan si ay ardayda fasalada 6 ilaa 12 (iyo wixii ka sii dambeeya) uga caawiyaan taageerada BILAASHKA AH kuleejka iyo xirfadaha shaqo. Joogso Xarunta Kuleejka iyo Xirfadaha Shaqo ee kuugu dhow si aad u hesho caawimaada kuleejka iyo xirfadaha shaqo! Afar goobood ayaa furan xagaagan Isniinta ilaa Jimcaha, 9:00 subaxnimo ilaa 3:00 galabnimo. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijyada xagaaga iyo saacadaha ay furan yihiin xafiisyada, fadlan booqo mpsmke.com/CACC.

Fursadaha Madadaalada MKE ee loogu talagalay Dhalinyarada, Dadka Waaweyn, iyo Qoysaska
Sannadka oo dhan, Milwaukee Recreation waxay bulshada oo dhan siisaa madadaalo nabadgelyo, baashaal leh, oo qiimahooda la awoodi karo iyo waxqabadyo kobcin leh. Barnaamijyo

badan waa bilaash ama waa kuwo qiimo jaban, iyo deeqaha waxbarashda dhalinyerada ayaa la heli karaa. Barnaamijyo dheeraad ah ayaa la bixiyaa inta lagu jiro bilaha xagaaga, taasoo carruurta iyo qoysaska siineysa xitaa fursado badan oo ay ku sii firfircoonaan karaan, ay hindisaad ku samayn karaan xilliyada firaaqada, ayna ku abuuran karaan xusuus nololeed. Diiwaangelinta xagaaga way furan tahay hadda.

Daryeelka Carruurta Xagaaga ee Qiimihiisa La Awoodi Karo
Milwaukee Recreation waxay ku bixin doontaa daryeelka carruurta oo qiimo jaban xagaagan waxayna ku bixin doontaa ku dhowaad 70 goobood oo magaalada oo dhan ah. Goobaha waxay furmi doonaan taariikho kaladuwan ee Juun qiimahana wuu ku kala duwan yahay goobaha. Macluumaad intaa ka badan iyo khariirada goobaha ka hel mkerec.net.

Akhriska Xagaaga

- Akhrisyada MPS xilliga xaggaaga! Ka hubi bilawga bil kasta wixii talooyin buug ah, ama ka shaqeey bilahaagii la soo dhaafay. Waxaad sidoo kale soo jeedin kartaa buugaagta aad ugu jeceshahay in lagu soo daro liiska.
- Ku biir Maktabada Dadweynaha ee Milwaukee barnaamijyada wax akhriska ee xaggaaga ee loogu talagalay dhalinyerada, qaangaarka, iyo dadka waaweyn.

Waad ku mahadsantihiin qof walba sida aad sida ugu wanaagsan ugu shaqeyseen sanad dugsiyeedkan. Aynu qabanno qaybteenna si aan u xaqiijino in la helo xagaa ammaan ah oo wax soo saar leh!

Daacad kuu ah,

Dr. Keith P. Posley
Maamulaha Guud ee Dugsiyada